


# CCS ELEVATE


## BUCKEYE MIDDLE SCHOOL

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadayaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad- raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyaad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.

Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxa ay ku talinayaan in Guddida Waxbarashadu xiro **Dugsiga Dhexe ee Buckeye Middle School (1962)** oo ay ku soo dhaweeyaan ardaydan Dugsiga Sare ee Marion-Franklin High School, iyaga oo abuuraya goob fasalka 6-aad ilaa 12-aad ah oo leh ee dugsi dhexe iyo dugsi sare oo isku dhul-wax-barasho ah (isku campus ah).



**Dugsiga Sare ee Marion-Franklin High School (1951) wuxuu u adeegi karaa 1012 arday;** si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2023-2024, 405 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-gelisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 42%.

Dugsiga Buckeye, wuxuu ku yaallaa dhinaca koonfureed (south side) ee magaalada, hadda waxaa dhigta 340 arday. Dib-u-habaynta Dugsiga Dhexe ee Buckeye Middle School ee goobta dugsiga Marion-Franklin school wuxuu si fiican ugu adeegi doonaa dhismaha iyada oo la filayo adeegsiga 70%. Ka soo guurista ardayda Buckeye una soo rarista Dugsiga Marion-Franklin waxay siin doontaa dhisme ka weyn kii hore oo leh fursad lagu bixiyo bixinno tacliineed oo xooggan, tiyaatar iyo xarumaha ciyaaraha fudud. Tani waxay siin doontaa ardayda dugsiga dhexe hawlo badan oo ka baxsan manhajka sida muusikada, hadalka iyo doodaha, jilidda, farshaxanka muuqaalka, iyo ciyaaraha fudud.